Cabdalla Cumar Mansuur

# Midaynta iyo Horumarinta Af-soomaaliga[1]

Kaddib markii loo kala qaxay dalal afafkoodu kala duwan yihiin, waxaa la dareemay ahmiyadda uu leeyahay afka hooyo iyo qoraalkiisuba. Gaar ahaan xagga qoraalka, afku wuxuu noqday midka keliya ee laysku afgaran karo. Arintan ayaana keentay in ay sare u kacdo danaynta afka hooyo iyo in adeegsigiisa la badsado.

Soomaalidii uu faranjigu ku tilmaami jiray dad wada gabyaa ah, haatan waxay noqdeen dad wada qoraa ah. Geedkii hoostiisa lagu doodi jirayna waxaa lagu beddelay internet iyo qalabka warbaahinta kale. Tiro badan iyo tayo fiican laysla waa. Sidaa darteed waxaa dhashay dooda badan oo ku saabsan Af-soomaaliga. Dad ayaa aaminsan in afku aanu xasilnayn, waxayna u aanaynayaan: kala duwanaanta lahjadaha iyo farqoraalka Af-soomaaliga.

Haddaba, anigu ma qabo in lahjadaha kala duwan iyo farqoraalka Af-soomaaligu ay yihiin caqabadaha hortaagan midaynta iyo horumarinta afkan, waxaana muujinaya arrimaha soo socda ee aan ku soo bandhigayo qaybta hore (qodobbada: 1 & 2), qaybta dambana (qodobbada 3 & 4) waxaan wax ka tilmaamayaa dhibaayooyinka dhabta ah ee ka jira afka oo u baahan in wax laga qabto.

## 1. Kala duwanaanta lahjadaha

Lahjadaha Af-soomaaliga, oo tiradoodu ka badan tahay 25 afguri ama lahjadood[2], marka laga eego sida qaababkoodu ay isugu dhowyihiin, waxaa guud ahaan loo qaybin karaa 5 ama 4 koox lahjadeed[3]:

1) ***Lahjadaha Maxaatiri*** (oo ka kooban 10 farac lahjadeed) waxaa looga hadlaa dhammaan degaamada soomaaliyeed, marka laga reebo inta u dhaxaysa labada webi.

[1] Halkan waxaan uga mahadnaqayaa aqoonyahannadii gacan igu siiyay diyaarinta qoraalkan, waxaana ka mid ah barayaashan jaamacadeed: Cabdirashiid Ismaaciil Maxamad, Mustafa Abdullahi Feiruz iyo G. Banti.

[2] Afafka *Boni/Awera* iyo *Rendille* (Kenya), *Gariirre iyo Bayso* (Itoobiya), oo ah afaf ay aad ugu dhowyihiin Af-soomaaliga, waxay ka mid ahaan lahaayeen lahjadaha Af-soomaaliga haddii looga hadli lahaa gudaha dalka soomaaliyeed. Sidatan ayayna af ahaan isugu dhowyihiin afafkaas iyo lahjadaha soomaaliyeed: *afka Rendille & lahjadaka Maxaatiri, afka Boni & lahjadaha May, afafka Gariirre iyo Bayso & lahjadda Dabarre*.

[3] Lamberti (1984) wuxuu u qaybiyay 5 koox lahjadeed: lahjadaha Woqooyi, Banaadir, Maay, Digil iyo Ashraaf.

Guud ahaanna waxaa loo qaybin karaa laba koox hoosaad: *Maxaatiri Woqooyi* iyo *Maxaatiri Koofureed*.

2) ***Lahjadaha Maay*** (oo ka kooban 5 farac lahjadeed**)** waxaa looga hadlaa degaanka u dhexeeya labada webi, gaar ahaan dhanka koonfur-galbeed Soomaaliya.
3) ***lahjadaha, Maa-dhati*****/*****Ashraaf*** (oo 2 ah) waxaa looga hadlaa degmada Shangaani (Muqdisho) iyo magaalada Marka.
4) ***Lahjado beeleed*** (oo 8 ahi) waa lahjado beelo u gaar ah, laba kooxood ayayna ka koobanyihiin:
   a) ***lahjadaha Digil*** **(**oo ah 5 lahjadood oo kala duwan**)** waxaa ku kala hadla beelaha: *Garre, Jiiddu, Tunni, Dabarre, Oroole*, waxaana looga hadlaa deegaanka ku teedsan webiyada ee dhanka koonfureed ee Soomaaliya.
   b) ***lahjado jacbur*** (oo 3 ah) waxaa ku hadla beelaha: *Hubeer, Reer Aamiir, Riibo*[4].

Lahjadahani waxyaabo badan ayay ku kala duwanyihiin oo la xiriira: codaynta, sarfiga, weeraynta iyo ereyadaba. Isla markaana waxaa muuqata in Af-soomaaligu, qoraal ahaan iyo hadal/oraah ahaanba (oraly), uu aayar aayar u midoobi rabo. Waxyaabaha caddaynayana waxaa ka mid ah:

## 1.1. Kala duwanaanta xagga sarfiga falka

Waxa aan halkan tusaale ahaan ugu soo bandhigaynaa habka ay lahjaduhu u adeegsadaan fal amminkiisu yahay joogto socoto, sida falka "*qaado"*.

**Lahjadaha Maxaatiri**:
1) <u>waan qaadanayaa</u>
2) waan qaadanaayaa
3) <u>waan qaadana hayaa</u>
4) waan qaadan hayaa
5) waan qaadanaa
7) waan qaada haa
8) waan qaadanooyaa

**Llahjadaha Maay**:
9) qaadadoo haya

**Lahjadaha Digil**
10) qaadaal hasha (Jiiddu)
11) qaadad aaya (Tunni)
12) qaada sheyay (Garre)
13) qaadadoo heesha (Dabarre)

**Lahjadaha Maadhati (Ashraaf)**
14) qaadadoo haasha (Shangaani)
15) qaadasha reebe(Marka)

Iyadoo aan cidna amar ku bixin in la qaato lahjad gaar ah ayaa dhammaan soomaalida ku hadasha 25ka afguri isku dayda in ay qoraal ahaan u adeegsato laba qaab sarfi oo ka mid ah

[4] Saddexdan lahjadood, oo asalkooda ah *Maxaatiri*, waxaa aad u saameeyey lahjadaha *Digil* iyo *Maay* oo la deegaan ah.

**10ka** lahjadood ee *Maxaatirida*,qaabka labada tusaale ee hoosta ka xarriiqan ayaana loo badanyahay (<u>*waan qaadanayaa*</u> & <u>*waan qaadana* ***hayaa***</u>).

## 1.2. Kala duwanaanta xagga weeraynta, sarfaha iyo codaynta

Isla lahjadaha Maxaatiri, gaar ahaan labadaa qaab lahjadeed ee loo badanyahay adeegsigooda, ayaa waxay leeyihii qaabab qola walba u gaar ah, haddana qoraal ahaan lama adeegsado, tus.:

| Waa la qoraa | lama qoro |
|---|---|
| • *Markaasuu yiri* | ***suu yeen*** *(Bari)* |
| • *Waan baxayaa* | *waa baxayaa* ***aan*** *(Bari)* |
| • *Waxaan idiin oran lahaa* | *waxaa* ***nii*** *oran lahaa (Jabuti)* |
| • *Waxaan ku iri* | *waxaan* ***kaa*** *idhi (Jabuuti)* |
| • *Anaa cuna* | *anaa cun**o** (Koofur)* |
| • *Ma rabo* | *ma rab**i** (koofur)* |
| • *Maxay tiri?* | ***x****ay tiri? (Koofur)* |
| • *Wuxuu yiri/yidhi* | *wuxuu dhahay (Koofur)* |
| • *Gar/gadh* | *ga**j**/ger* |

Qaababka qaybta midig, qoraal ahaan lama adeegsado, cidna ma oran yaan la qorin, isla markiina, hadal ahaan, qolo waliba si caadi ah ayay u adeegsataa qaababkeeda. Labadan tusaale (1.1 & 1.2) ee kor ku xusan waxay astaan u yihiin horumarka habsocodka midaynta Af-soomaaliga (standardization process).

## 1.3. Kala duwanaanta xagga ereyada

Waxaa jira laba qaab ereyeed oo micnahoodu isku mid ah, oo lagu muransanyahay midkii la qaadan lahaa. Ereyadaas waxaan u kala saaraynaa saddex qaybood.

### *1.3.1. Erey laba siyood oo yara kala duwan loogu dhawaaqo:*

Ereyo micnahoodu isku mid yahay, qaabkooduse wax yar kala duwanyahay, oo afafka qalaad lagu yiraahdaa « variant/variante », ma aha wax Af-soomaaliga u gaar ah, tus. :

**-Af-soomaali :**

*sheekh & shiikh*
*dayaarad & dayuurad*
*xiriir & xidhiidh*

**-Af-ingiriisiga** (Britain & US)**:**

*Grey & gray (Am)*
*colour & color (Am)*
*anaemia & anemia (Am)*

**-Af-carbeedka:**

*Allaatii & allawaatii (kuwii dh.)*

**-Af-talyaaniga:**

*Comprare & comperare*

### *1.3.2. Ereyada sammiga ah (saynonyms):*

Sidoo kale, waxaa jira ereyo qabkooda kala duwan yahay, oo haddana isku micne leh:

**Af-soomaaliga**: *gudin & masaar*
*gaari & baabuur*

**Af-ingiriisiga**: *postman (UK) & mailman* (US)

Ereyada sammiga ahi af walba waa ku jiraan, waxayna kordhiyaan hodantinnimada afka:

a) Qaarkood adeegsigoodu wuu yara kala duwanyahay, sida:

- **Soomaali**: *Wadne iyo qalbi (wadnaxanuun & qalbixumo)*
*weji* iyo *fool* (weji malaha & foolxumo)

- **Ingiriisi**: *house & home* (house work & home work)

b) Waxtarka badnaanta ereyada sammiga ah waxaa ka mid ah:

- **Soomaali**: *guri, aqal, hoy,* ***min*** *(Kush.*min/man)* ***min****fiiq,* ***min****yaro,* ***min****xiis;(****min*** *= ilmagaleen).*

*"**Min** daroof leh aqal daahyo weyn dadab la heedaamay" (Ina Cabdulle Xasan)*

**- Carabi**: *daar* (sar), *bayt* (guri, reer), manzil, sakan..

- **Ingiriisi:** car, auto, automobile, motorcar

c) Ereyo ka soo jeeda lahjadaha kale (Banaadir, Maay iyo Digil) ayaa buuxin kara kaalin bannaan, sida:

*Walax (substance), eysin ("nephew"), bed (area)*

### *1.3.3. Ereyo laba siyood ama ka badan loo wadareeyo*

Waxaa jira ereyo laba siyood loo wadareeyo oo labadaba sax ah, waxaana ka mid ah:

*Maro (marooyin/maryo)*
*huuri (huuriyaal/huuriyo)*
*Buug (buugaag, buugag, buug(ta))*

Arrintan waxaa la wadaaga Af-carabiga, tus.:

| | |
|---|---|
| *Taalib (tullaab/talabah)* | طالب طلاب/طلبة |
| *Jaamicah (jaamicaat/jawaamic)* | جامعة جامعات/جوامع |
| *Cabdi (cibaad/cabiid)* | عبد عباد/عبيد |

Haddaba, waxaa qaybtan aan ku soo gunaanadaynaa, sida laga dheehan karo falanqayntan kooban, in aanay jirin dhibaato badan oo hortaagan geeddisocodka midaynta

Af-soomaaliga. Taas micnaheedu ma aha in Af-soomaaliga, qoraal ahaan loo adeegsado, uu wada sax yahay. Qaladaad badan baa la sameeyaa oo la xiriira, inta badan:

1) Higgaadda ereyga (spelling) oo aad looga liito, gaar ahaan, shibbanayaasha labanlaabma iyo shaqallada dhaadheer ayaa gafafka ku badan, sida :

   **gudiga (guddiga), *arin (arrin), *ogol (oggol, *xaruun (xarun) iwm.*

2) Qaladaad naxwe oo ka soo jeeda lahjadaha qaarkood. Tus.:

   *Waa *yimid**ay**/*yimid**day**[5], (*waxaa ka saxsan: *waa yimi(d))*
   *laba *qof**ood**[6] (*waxaa ka saxsan: *laba qof)*

3) Ereyo qaarkood oo loo adeegsado si aan habboonayn, tus. :

   waxaa laysku qaldaa adeegsiga labadan magacuyaal:

   *annaga[7] & innaga,*
   *kaayaga & keenna*

Afafkii qarniyaal hore la qoray ayaaba dadka ku hadlaya qaladaad ka fakadaan, sida :

**Af-Carbeedka:**

لسنا **معلمون** معلمين *(lasnaa ***mucallimmuuna*** (waa qalad) *mucallimiina* (baa sax ah)*)*

لنا **ولدين** ولدان *(lanaa ***waladayni*** (waa qalad) *waladaani* (baa sax ah)*)*

**Af-Talyaaniga:**

- dad baa isdaba dhiga laba xiriiriye: **ma pero* (laakiin haseyeeshe)
- qaarkood waxay qaldaan adeegsiga qaab faleedka loo yaqaan "*subjunctive*":
  *credevo che tu *arrivavi* (waa qalad) *arivassi oggi* (baa sax ah)

Haddii qaar ka mid ah kuhadlayaasha afafkan la qoray qarniyaal ka hor ay weli ka fakanayaan qaladaadkaa oo kale, maxaa laga filayaa dadka ku hadla af qoran nus qarni ka yar, haddana aan lahayn dugsiyo laga barto naxwihiisa oo sax ah iyo adeegsiga qaamuuskiisa?

Haddaba, arrinta midaynta lahjadaha Af-soomaaliga, guud ahaan, waxaan u kala saari karnaa saddex qaybood:

---

[5] Falalka dibkabayaasha lehi waxay iska rogrogaan falka dhammaadkiisa, laakiin shanta fal ee horkabayaasha leh waxay iska rogrogaan falka hortiisa oo keli ah, (*waan imi(d), waad timid...waan nimid)*, markii laga reebo *idinku* iyo *iyagu* oo falkooda hor iyo gadaaaba iska rogroga (sida: *waad **t**imaad**een**, way yimaad**een***).

[6] Magacyada lagu wadareeyo dibkabaha **–o** ayaa dibkabaha **–ood** qaadanaya, sida: *gabdho (labo gabdhood), fardo, kabo* iwm, laakiin ereyga "*qof*" kuma wadaroobo dibkabaha –o, sidaa darted, naxwe ahaan, kuma habboona in la yiraahdo *2 qofood .

[7] *Annaga & kaayaga* waxaa la adeegsadaa marka lalahadluhu uu ka baxsanyahay waxa laga hadlayo (exclusive) (tus. *annagu arday baanu nahay, adiguse macallin baad tahay*). *Innaga & keenna* iyagana waxaa la adeegsadaa marka lalahadluhu uu ka mid yahay dadka hadlaya (incusive) (tus,: *innagu Soomaali baaynu wada nahay*).

1. Kuwa iskood u midoobay (sida aan ku soo muujinay qodobbada 1.1 & 1.2)
2. Kuwa yara kala duwan oo aan dhibaata lahayn, sida afaf kaleba ay u leeyihiin (sida ku cad qodobka: 1.3)
3. Kuwa kala duwan ama yara qaldan, iyaguna iskood ayay u xallismi doonaan, sida Yaasiin C. Keenediid (1976) uu horeyba ugu xusay gogoldhigga qaamuuskiisa:

   "*Af-soomaaligu waa af qorid lagu bilaabay, oo hadda weli qolo waliba moodeyso in ereyada gobolkeeda u gaarka ahi, ay af-soomaaliga «sare» yihiin, kuwa kalena «afguri» ... Muddo kaddib,isaga ayaa inta isku darma oo is dheeha, isku dubbadhici doona oo midoobi doona*."

## 2. Maxaa ka jira doodaha ka taagan xagga farta Af-soomaaliga?

Doodahan badan ee ku saabsan xasilloonidarrada Af Ssoomaaliga, xagga hab qoraalka, labo qaybood ayaan u kala saari karnaa: dood ku saabsan in farta Af-soomaaligu ay qabyo tahay iyo dood ku saabsan in qoraalka ereyada qaarkood aanu midaysnayn. Doodahan badankoodu waxay ku salaysanyihiin waxyaabo aan u gaar ahayn Af-Soomaaliga, arrintanna waxaa la wadaaga afaf kale oo la qoray qarniyaal badan ka hor, waxaana muujinaynaa qodobbada soo socda.

### 2.1. Doodda qabyannimada farta Af-soomaaliga

Sideedaba, way adagtahay in, guud ahaan, afafka adeegsada alifba'da laga dhex helo af alifba'diisu ay wada koobayso dhammaan codadka uu afkaasu leeyahay, Af-Soomaaliguna waa la mid, waxyaabaha caddaynayana waxaa ka mid ah labadan qodob ee soo socda.

#### *2.1.1. Shibbanayaasha Af-soomaaliga*

a) Inkastoo shibaneyaasha qorani ay yihiin 22, haddana waxaa jira in Af-Soomaaligu uu leeyahay codad ama shibbaneyaal kale oo aan la qorin[8], waxaana ka mid ah:

| **qoran** | **ma qoran** |
|---|---|
| ○ ***b**ad* /**b**/ | <u>*da**b*** /**p**/</u> |
| ○ ***d**al* /**d** / | <u>*e**d**eb* / **ð** /</u> |
| ○ ***n**alka* / ***n***/ | <u>*fa**n**ka* /**ŋ** /</u> |
| ○ ***j**ilib* /***j***/ | <u>***j**aamac* / **tʃ** /</u> |
| ○ ***dh**al* / ɖ / | *ba**dh*** / ɽ / |

[8] Arrintan ma aha ilduuf iyo kubaraarugid la`aan ee kas iyo ogaal ayaa looga tegey! Cilmi-afeedka, gaar ahaan cilmiga "phonology"-ga ayaa si faahfaahsan uga baaraandega. Codadka la qoray waa nooca loo yaqaan "phoneme" (sida ereyada *dal* & *bal* micnahooda waxaa kala duway labada cod d & b), codadka laga tegayna waxaa loo yaqaan "allophone" (oo ah codad aan u keeneyn wax farqi ah marka ay ku kala jiraan laba erey, sida: da**b** & da**p**).

Laba arrimood ayaa loo aanayn karaa sababta aan loo qorin xarfahan.

1. Xarfahan, oo midkiiba uu leeyahay dhawaaqyo yare kala duwan, marka uu ku sugan yahay billawga alanka iyo marka uu ku sugan yahay alanka dhammaadkiisa, oo haddana wax isbeddel ah aan ku sameynayn micnaha ereyga (sida: *dab & dap*), in xarfo gaar ah loo kala sameeyo waa dhaqaaladarro.

2. Waa xarfo codkooda aan cid kasta si fudud u dareemi karin farqigooda, marka laga reebo labada xaraf ee dambe (/ **tʃ** // **&** / **ɽ** /).

3. Xarfahan codadkooda waxaa laga helaa meelo u gaar ah oo ka mid ah ereyga, waxayna ku yimaadaan xaalado gaar ah. Waxaa tusaale ahaan u soo qaadanaynaa sababta loo qori waayay codka *dha'*da fudud (/ **ɽ** / sida *ba**dh***), waxaana ka mid ah:

- *Dha'*dan fudud marna lagama helo erey billawgiisa, tus.: ***dh**ar, **dh**iil, **r**ati, **r**un* (labada cod ee labadan xaraf (*dh & r*) si isaga mid ah ayaa Soomaalida oo idil ugu dhawaaqdaa).

- Waa in shaqal ka horreeyaa, sida: *a**dh**i, ba**dh**.*

- Ereyo kooban ayaana leh codkan, sida.: *foo**dh**i, gaba**dh**, yi**dh**i, xi**dh**ii**dh**, may**dh**, a**dh**i, ba**dh*** iwm.

- Soomaalida oo dhan sida la rabo uguma dhawaaqi karto, sidaas ay tahay waa la wada fahmayaa. Haddaba, sida qurub diiradeedka *baa* & *ayaa* oo qoloba midka ay doonayso ama taqaan ay u adeegsato (*Cali baa yimid / Cali ayaa yimid*) ayaa habboon in sidoo kale, qoloba dhawaaqii u fudud labada cod (r/dh) ay adeegsato, sida: *xi**dh*** /**ɽ**/[9] & xir / **ɖ** /.

b) Sidoo kale, 7da shibbane ee laballaabma (kooxda A) ka sokow, waxaa jira shibbanayaal kale oo laballaabma oo haddana aan la qorin (kooxda B).

[9] -"*Dh*"-dan fududi / ɽ / waa cod iskiisa u madaxbannaan, kamana imaan codka "*r*", waxaana caddaynaya afaf la hayb ah Af-Soomaaliga ayaa la wadaaga (Prof. Giorgio Banti ayaan si toos ah uga soo xigtay warkan), tus.: Soomaali: *wuu yidhi*, Saho: *yedhxe*, Oromo: *yedhe*

| A. Shibbanayaasha laballaabma ee la qoro | B. Shibbanayaasha laballaabma ee aan la qorin | |
|---|---|---|
| ***b***: *xa**b**ad<>xa**bb**ad* (laabta & rasaas/hal) | ***f***: *a**ff**ar* | *a**f**ar* |
| ***r***: *ca**r**ab<>ca**rr**ab* (nin carab ah & carrabka) | ***t***: *ra**tt**i/ gattay* | *ra**t**i/ga**t**ay* |
| ***g***: *ruu**g**a<>ruu**gg**a* (ruug(id) & jilib/law) | ***y***: *i**yy**o* | *i**y**o* |
| ***d***: *ri**d**o<>ri**dd**o* (tuuro & gantaal) | ***dh***: *gaba**dhdh**a* | *gaba**dh**a* |
| ***l***: *shi**l**in<>shi**ll**in* (lacag & nooc geed (kedi)) | ***c*** : *maga**cc**a* | *maga**c**a* |
| ***m***: *dha**m**aan<>dha**mm**aan* (cabbaan & kulli) | ***x*** :*mada**xx**a* | *mada**x**a* |
| ***n***: *kee**n**a<>kee**nn**a* (ina keena! & waa keenna) | ***h:*** *ra**hh**a* | *ra**h**a* |
| | ***q:*** *dii**qq**a* | *dii**q**a* |
| | ***s:*** *a**ss**aw* | *a**s**aw* |

Sababta ay khasab ku noqotay in la qoro shibbanayaasha laballaabma ee qaybta bidix (***kooxda*** A) waxay tahay si aan loogu wareerin micnaha kala duwan ee ereygu yeelan karo marka shibbanaha laga dhigo mid keli ah (sida: *carab & carrab*); laakiin shibbanayaasha kale (***kooxda*** B) iyagu isbeddel micne uma keenaan ereyga haddii shibbanuhu uu laballaabanyahay iyo haddii kale (sida: *iyyo & iyo*), hadday keenaanna waa dhif. Sidaa darteed, iyadoo la raacayo xeerka dhaqaalaynta qoraalka farta, ayaa looga tagay in la qoro iyagoo dhawaaq ahaan labanllaabma.

Sida aan korba ugu soo xusnay, codka *dha'*da fudud oo aan ahayn mid Soomaalida oo dhan wada adeegsan taqaan, sidaa darteedna looga yeelin xaraf gaar ah, ayaa dhici karta in ay keenaan, mararka qaarkood, micne kala duwan, siiba marka ay qoraal tahay, sida: *Cali wuu may**dh**ay*, weertan waxaa loo fasiran karaa in *Cali uu may**rt**ay (may**dhdh**ay)* iyo in uu wax *mayray (maydhay)*. Markan oo kale "*context*"-iga ama warka raacsan ayaa laga garan karaa micnaha loola jeedo[10]. Arrintan afafka oo idil ayay wadaagaan, waxaana la yiraahdaa "*ambiguity*" oo ah in erey ama weer loo fasiran karo laba micne oo kala duwan. Af-Ingiriisiga ayaa ka mid ah afafka ku badan arrintan, sida ku cad weerta soo socota: *Each of us saw her duck*. (It is not clear whether the word "duck" refers to an action of ducking or a duck that is a bird[11]).

---

[10] Marka la hadlayo labada macne dhegtu way kala garan kartaa, oo iskuma khaldamaan; laakiin marka ay qoraal tahay ayaa labada macne laysku khaldami karaan, markaasna, waxaa loo baahanyahay in la eego "context"-iga ama warka raacsan si loo fahmo micnaha loola jeedo ereygaas.

[11] Waxaan ka soo dheegey: Definition and Examples of Literary Terms: http://literarydevices.net/ambiguity/

### *2.1.2. Shaqallada Af-soomaaliga*

Shaqallada qoran waa 10 (5 gaagaaban iyo 5 dhaadheer), haseyeeshee, dhawaaq ahaan, shaqalkiiba 2 cod ayuu leeyahay cod fudud iyo cod culus (10 x 2 = 20 cod shaqaleed), tus.:

shaqalka "*u*" iyo "*uu*" iyo mid kasta labadiisa cod ee kala duwan:

| | | |
|---|---|---|
| *2 shaqal oo culculus:* | *duul(ka)* | *dul(ka)* |
| *2 shaqal oo fudfudud :* | *duul (id)* | *dul(dusha)* |

Arrintani ma aha wax Af-Soomaaliga u gaar ah, waxaa la wadaaga afaf kale ee badan, tus.: Af-Ingiriisigu wuxuu leeyahay 20 cod shaqalleed oo kala duwan, sidaas ay tahay 5 shaqal oo qura ayaa la qoraa, tus. : shaqalka "*a*" iyo afarta siyood ee loogu dhawaaqo:

- *arm* / ɑː /
- *ago* / ə /
- father / ɑ /
- *hat* / æ /

Af-iswedeshka, isna 19 shaqal ayuu leeyahay, waxaana qoraal ahaan la adeegsadaa 9 shaqal, oo saddex iyaga ka mid ahna astaamo u gaar ah ayay dusha ku leeyihiin. Astaamahasna waxaa loo yaqaan « *diacritic* ».

### *2.1.3. Ereyo isku dhigaal kala dhihid ah*

Waxaa jira ereyo aan badnayn oo qolo lab ka dhigta qolana dheddig. Labadooduba waa sax, waa arrin ku xiran hadba meesha uu codkacu (*high tonal* ) ku dhacayo.

| | |
|---|---|
| ***á**rrin-**ka*** | *arr**í**n-**ta*** |
| *b**á**llan-**ka*** | *ball**á**n-**ta*** |

Haddii codkacu uu ku dhaco shaqalka ka horreeya shaqalka dambe ee ereyga (sida: ***à**rrin-**ka***), magacaasu waa lab, haddiise uu ku dhaco midka dambe (sida: *arr**ì**n-**ta***) magacu waa dheddig, waxaana la mid ah ereyada soo socda:

| | | |
|---|---|---|
| (Erey: lab / dheddig) | *ínan **(ka)*** | *inán **(ta)*** |
| (Erey: lab keli. /dh. wadar) | *díbi **(ga)*** | *dibí **(da)*** |

Ereyada noocaas oo kale ah, qoraal ahaan, iyagana waxaa cayntooda laga garan karaa hadba "context"-ga ay ku dhex jiraan, hadal ahaanna, codkaca ayaa laga garan karaa.

Xitaa qoraalka Af-carabiga, oo caadi ahaan, shaqal & shad midna aan lahayn, weerta ayaa laga garan karaa waxa uu yahay ereygu, sida: ereyga كسر (ksr) 4 siyood ayaa loo akhrin karaa oo micnahooda kala duwan, waa kuwan iyagoo loo yeelay shaqallo iyo shadba:

- *Kasara* (waa jebiyay) — *Kusira* (waa la jebiyay)
- *Kassara* (waa jejabiyay) — *Kasr* (jebin, jab...)

Sababaha ugu doorka roon ee loogu yeeli waayay astaamo gaar ah (*diacritic*) Af-soomaaaliga shaqalladiisa culculus iyo codkacba waa labadan arrimood:

1. Haddii loo yeelo astaamo gaar ah sida Swedeshka, farsame ahaan iyo dhaqaale ahaanba, arrintaa dhibaatadeeda ayay leedahay, oo waxaa loo baahnaanayaa qalab qoraal oo gaar ah.
2. Dadweynaha aan badankoodu wax baran way ku adkaan lahayd kala saaridda qoraalka shaqalka culus iyo midka fudud iyo adeegsiga codkaca.

Haddaba, alifba'da Af-soomaaligu, sida afafka kale ee dunida ka jira, kama wada koobna dhammaan codadka uu afku leeyahay. Aqoonyahannada ku xeeldheer cilmiga codaynta ayaa ku shaqa leh inay baaraan inta cod ee luqadi leedahay iyo wixii la xiriira, waana cilmi heer jaamacadeed. Sababaha looga dhigay alifba'da mid aan wada koobayn codadka ee luqadi leedahay waxaa ka mid ah arrimahan hoos ku taxan, oo badankooda uu horay u adeegsaday Guddiga Af-soomaaligu 1961[12].

- Waa in la fududeeyaa qoraalka farta, si dadweynuhu si sahlan ugu adeegsan karo, gaar ahaan inta aqoonta yari iyo caruurta.
- In la raadiyo sidii looga maarmi lahaa in xarfaha loo yeelo astaamo gaar ah (*diacritic*), iyadoo la tixgelinayo arrimaha farsamo iyo dhaqaale.
- Qoraalka farta waa in la dhaqaaleeyaa, oo laga tagaa wixii laga maarmi karo.
- Waa inay noqotaa far lagu garaaci karo qalab qoraalka aad ugu baahsan dunida (international keyboard)[13].
- Waa in fartu ay ka koobnaato xuruufo codkooda laga heli karo lahjadaha badankooda.
- Waa inayna ahaan mid jahawareer u keenta akhristayaasheeda.
- Farta waxaa loogu talaggalay dadka ku hadla afkaas, sida aan ka dareemayno afafka: Faransiiska, Ingiriisiga iyo Carabigaba (oo shaqal & shad la'aan loo adeegsado).

[12] Guddiga Af-soomaaliga, oo ka koobnaa 9 xubnood oo ka mid ahaayeen: Muuse Galaal, Shire Jaamac, Yaasiin C. Keenediid iyo Kaddare, oo loo igmaday in ay ka warbixiyaan 17 far ee markaas la soo bandhigay, ayaa sannadka 1961 soo saaray qoraalkan: «The Report of The Somali language Commitee ». Warbixintaas waxaa ka mid ahaa in xulashada farta ku habboon Af-soomaaligu ay buuxiso 17 shardi, qaar kuwaas ka mid ahi waxay ka mid yihiin kuwa kor ku xusan.

[13] Natiijadeedana, waa taa fartaas maanta u suurtaggelisay soomaalidu meel kastoo ay ka joogto dunida daafaheeda in ay hesho « keyboard » si fudud loogu qori karo farta Af-soomaaliga, sida Af-ingiriisiga.

Haddii lagu saleeyo baahida shisheeyaha aqoonta leh waxaa la dulminayaa dadka u dhashay afkaas oo badankooda aqoonta yar.

## 2.2. Doodda habdhigaalka ereyada qaarkood ee Af-soomaaliga

Ereyo badan ayaa habqoraalkooda lagu kala duwan yahay, sida:

### *2.2.1. Qoraalka ereyada lammaanan*

Qoraalka ereyada lammaanan ee Af-soomaaligu waxay u kala baxaan labo nooc:

a) Kuwo aan lagu kala duwanayn, sida:
*horumar (hor+u+mar), habdhis (hab+dhis), maragmadoonto (marag+ma+doonto) iwm.*

b) Kuwo aan laysku raacsanayn isqabadkooda, sida:

| | |
|---|---|
| *<u>biyamareen</u>* | *<u>waayo-aragnimo</u>* |
| *biya-mareen* | *waayoaragnimo* |
| *biyo-mareen* | *waayo aragnimo* |
| *biyommareen* | *waaya'aragnimo* |

Xitaa Af-igiriisigu wuxuu leeyahay ereyo lammaanan oo siyaabo kala duwan loo qori karo, sida:

-*Airbed, air-bed, air bed* (Catherine E.Love 1985)
-*Head-master, headmaster, head master* (Hornby A.S. 1986)

Haddaba, uma arko in dhibaato weyn tahay in ay kala duwanaadaan habka laysugu lifaaqayo ereyada lammaanan, waqtiga ayaana sixi doona, waxaase aan ku talin lahaa:

1. Markii ay isu yimaadaan laba shaqal, halka ay iska qabanayaan labada erey ee laysku lammaanayo, waxaa habboon in loo dhaxaysiiyo xarriiqinta yar, sida *waayo-**a**ragnimo*, *cilmi-afeed* iwm.
2. In hamsada aan loo adeegsan meel aan ku habboonayn, sida: **waaya'aragnimo*, maxaayeelay hamsadu waxay leedahay cod hakasho oo gaar ah, sida *la'aan*, *go'doon,* waxaaba loo yaqaan "*glottal stop*", waxayna ka mid tahay shibbanayaasha (astaanteeda xagga IPA waa sidatan [ʔ].
3. Ereyadii isqaban kara in la xiriiriyo ayaa habboon, sida: *biyomareen, cilmibaaris, gaarigacan, sheekabaraaley iwm.*

### *2.2.2. Dhaqaalaynta Qoraalka*

Qoraalka sidiisaba waa in la fududeeyaa, lana dhaqaaleeyaa. Haddaba in ereyada qaarkood aan kala dhigdhigno ma habboontahay? Sow ma habboona in hadalka loo qoro sida loogu dhawaaqo marka la hadlayo?. Bal eeg labadan werood, oo laba siyood loo qoray, habkeeba u dhow sida, caadi ahaan, loo hadlo?

-Soomaali : -*Dubai*[14] ***baa na aad*** *soo mari /**baa aad na** soo mari*
*Dubai **baadna** soo mari*
*-Gabadhu wax **baa ay** igu tiri*
*Gabadhu wax **bay** igu tiri*

Sidoo kale, qurubyada:***-na, -se, -ba*** kuma habboona, qoraal ahaan iyo dhawaaq ahaanba, in gooni loo taago. Tus.: ***anba, adna, hase ahaatee*** iwm ilama habboona in loo qoro: ***an ba, ad ba, ha se ahaato ee***. Xitaa Carabiga qurubyadiisa "***bi-***" iyo "***li-***" gooni isuma taagi karaan, tus.:

-Carabi: (باسم*) **بسم** (لاالمعلم*) **للمعلم**

-Af-Ingiriisiga ayaa aad looga dareemaa adeegsiga ereyada la soo koobo, sida:

***I've*** *not/I* ***haven't (****I have not****),***
*I* ***don't (****I do not****),***
***I'm (****I am****)***

Haddaba, waxaa qaybtan hore ku soo gunaanadayaa in dhibaatooyinka ugu weyn ee hortaagan Af-Soomaaliga aanay ahayn arrimo la xiriira qoraalka farta ama kala duwanaanshaha lahjadaha, kuwaasoo aan aaminsanahay in aayar aayar looga gudbi doona, sida uu horeyba Yaasiin C. Keenadiid (1976) uu gogoldhigga qaamuuskiisa ugu xusay:

> "*Soomaalidu kolkay in badan wax qorto, afka iyo dhawaaqiisana si cilmi ah loo baaro, weeye kolka walaaca iyo laballaabowgu yaraanayaan oo docda hadalku isu jiito la wada raaci doono, wax isu dhowna la wada qori doono oo midoobi doona".*

Prof.Andrzejewski, oo muddo 40 sano baarayay Af-Soomaaliga, oo ilaa haatan aan muuqan qof sidiisi oo kale u baaray amaba ugu xeeldheer naxwaha Af-Soomaaliga, ayaa isna, beri hore, caddeeyay in Af-Soomaaligu uu muddo yar ku gaaray horumar afafka kale ka qaatay qarniyaal.

## 3. Waa maxay dhibaatada hortaagan Af-Soomaaliga?

Haddaba dhibaatooyinka ugu daran ee hortaagan horumarka Af-soomaaliga waxaa ka mid ah :

1) Af-Soomaaliga oo laga joojiyay in uu ahaado afka waxbarashada qaranka.
2) Nabaadguurka ereyada reermiyiga

[14] Waxaa habbon in magacyada shisheeye loo qoro sida caalamku u adeegsado, (sida: Dubai, NewYork, Kenya, Newton, Paris iwm), markii laga reebo magacyo la Soomaaliyeeyay, dida: Mareykanka, Itoobiya, Ruushka iwm.

3) Dad badan ayaa lumiyey qaddarinta afka hooyo, waxaana haybad la yeeshay af qalaad.

### 3.1. Nabaadguurka ereyada dhaqanka miyiga

Nus qarni ka hor soomaalidu waxay u badnayd miyiga, oo ah degaanka uu Af-Soomaaligu hodanka ku yahay. Markii loo soo qulqulay magaaloyinka waxaa bilaabmay in aayar aayar ay u nabaadguuraan ereyo badan oo la xiriira dhaqanka iyo degaanka miyiga, gaar ahaan labaatankan sana ee dambe. Ereyadaas oo kumanaal ah waxaa ka mid ah:

***Sidig, godobreeb, ooriyo, edeg, igar, heerin, naawile, wargure, xeerbeegti, gawl, qabo(da), qardaysasho, shafshafo, waalay, wareershe, buuni, jimiimic, gucun, gaso, dow, gayax(da) fardadhacsi, waqal iwm..***

Sababta ay ereyadan u lumeen waxaa muujinaya tusaalaha soo socota:

Raacatada soomaaliyeed waa dad socod badan, sidaa darteed falka socoshada iyo waqtiga la soconayo (24ka saac) wuxuu leeyahay in ka badan 10 qaab faleed iyo magaceed oo kala duwan (Ibraahim Y.A." Hawd" iyo Yaasiin Keenadiid (1976)):

***Kallah:*** *socod aroor hore la socdo*
***Jarmaad****: socod waabberiga ilaa cadceedsoobaxa*
***Baqool****: safar duhurkii la socda*
***Dhalandhool****: waqti qorrax kulul ku socosho*
***Carraw:*** *Socod waqti galab ah la socdo*
***Gudoodi:*** *Socod gabbaldhaca ilaa fiidka*
***Guuree****: socod fiidka inta ka dambaysa*
***Dheelmo****: socod guuraha habeenkii*
***Gud:*** *guuree, habeen socosho*
***U hoyo****: 1. meel la bariyo aadid. 2. habeen meel ku baryid*
***Galbo****: 1. Galab carraabid. 2. Geeriyood*

Ereyadan badankoodu way lumeen ama way ciribtirmi rabaan, maxaa yeelay reer magaalku, intooda badani waxay ku socdaan gaadiid, sidaa darteed micno uma laha ereyadaas badankoodu.

### 3.2. Af qalaad aqoontu miyaa?

Ereyadaas lumay ama lumi raba waxay albaabka u fureen in si fudud ay afkii ugu soo larmaan ereyo magaalo, oo badankoodu ay ka soo jeedaan af shisheeye, gaar ahaan af Ingiriisiga. Kuwaas oo weerar ba'an ku haya Af-soomaaliga.Weliba waxaa la caadaystay adeegsiga ereyo shisheeye, iyadaoo ay jiraan ereyadaas oo Af-soomaali ahina, sida:

- Tirada sannadka, lambarka telefonka iwm waxaa loo adeegsada Af-Ingiriisi, tus.:
  *2009 (tuu tawsan nayn),*
  *4.5 (foor boynti fayf),*
  *90% (naynti bersenti),*
  *Garawe2 (Garoowe tuu),*
  *SYL2 ( es waay el tuu)*
- Ereyada siyaasadda: *election, commission, condition, transparence, Hiiran State, mayor…*
- Magacyada hooteellada, shirkadaha iyo dacaayadahoodaba iyaga lamaba soo koobi karo.
- Qalabka warbaahinta oo laga sugayay inay wax ka saxaan afka, waa kuwan magacyadooda:
- *SNTV, STARTV, UNIVERSAL, SOMALI CHANNEL, ROYALTV, HCTV*, *iwm*.

Haddii dadka waaweyn hadalkoodu uu sidaas noqday maxaa laga filayaa dhallinta yaryar ee haatan af shisheeye uun wax ku barata (gudaha iyo dibaddaba)?

Haddii xaaladda ereyguurku ay sii socoto, ma sii jiri doontaa oraahdii shisheeye oo ahayd "*Nation of poets*" oo salka ku haysay hodantinnimadii af-Soomaaliga? Haddaan la xakamayn adeegsiga badan ee ereyada af shisheeye, waxaa dhici karta in ereyo badan ee Soomaaliyeed ay lumaan, kaalintoodana ay galaan ereyo af shisheeye. Ereyada soomaaliyeed ee habkaas ku lumay ama ku lumi raba saddex nooc baa loo qaybin karaa:

a) Ereyo soomaaliyeed oo ka lumay gobollada qaarkood, oo kaalintooda galay erey shisheeye, sida:
   - *beed (ukun), milix (cusbo), xashiish (qashin), masax (tir/tirtir)* iwm (waxay ka lumeen degaannada woqooyi).
   - *wasakh (dhusuq/uskag), deris (ollog), naf (rubad) iyo caqli (dhug), denbi (gabood), nooc (jaad)* (waxay ka lumeen degaannada koonfureed).

b) Ereyo soomaaliyeed oo ku dhacay isbeddel micne (shift meaning), oo micnahoodi hore ee asalka ahaa lagu beddelay ereyo carbeed, sida: *weji (fool)*[15], *garaac (dhaw)*[16].

*c)* Ereyo badan ee shisheeye oo adeegsigooda batay ayaa ereyo soomaaliyeed shiiqin raba, sida:
   *lambar (tiro), barlamaan (gole shacbi), looyar/abukaato (qareen), tiibii/tiibisho (qaaxo), maraq (fuud), malaariyo (duumo), nasiib (dhur), boos (jago, goob), wiig/usbuuc/Sitimaan (todobaad), jaalle/yalaw (huruud) iwm.*

---

15 In ereyga *fool* uu ahaa midka asalka ah waxaa caddaynaya ereyadan lammaanan iyo maahmaahda raacsan : *fool-ka-fool, foolxumo, fooltub, foolbaxsi, " far keliyahi fool ma dhaqdo".*

16 Ereyga *dhaw* in micnihiisi asalka uu ahaa *garaac* (*qaraca*, carabi) waxaa caddaynaya ereyadan: *carrabdhaw, fardhaw, suuldhabaale, dhawdhawle, dhegadhabasho, „Afdhabaandhab aayar ah nin ku aamusaan ahaye"* (Raage Ugaas). Lahjadaha *Maay* iyo *Digil*, Jabuuti iyo Galbeed shishe, intuba ereyga *dhaw* waxay weli u adeegsadaan sida uu ahaa micnihiisi hore, sidoo kale ayaa afkii Kushiitikada Bari ee hore (PEC) qaabkiisi iyo micnihiisi u ahaa *dhaw.

Adeegsiga badan ee ereyada af shisheeye wuxuu muujinayaa in Soomali badan ay lumisay waxa cilmi-afeedyahannadu ay yiraahdaan "*language loyalty*", yacnii qaddarinta afka hooyo ayaa ka luntay, waxaa la waynaaday ama haybad la yeeshay afafka qalaad.

# 4. Gabaggabo

Haddaba, si loo hormariyo Af-soomaaliga, loogana gudbo caqabadahan hortaagan afkan agoontoobay waxaa loo baahanyahay:

## 4.1. In la helo dawlad iska xilsaarta:

a) Sidii Af-soomaaliga looga dhigi lahaa afka waxbarashada dugsiyada (hoose ilaa sare)

b) In jaamacadaha soomaaliyeed ay lahaadaan waaxo u gaar ah daraasaadka Af-soomaaliga.

c) In ay ka qaybqaadato hirgelinta Akadeemiya goboleedda Af-soomaaliga "AGA".

d) In heer qaran loo sameeyo ereybixinno badan oo **midaysan** si loo dhameystiro casriyaynta (modernization) Af-soomaaliga, si Af-soomaaligu ugu suurtagasho in uu noqdo af lagu cabbiri karo fikradaha la xiriira aqoonta iyo farsamada casriga ah oo dhan.

## 4.2. Dad u hiiliya afkan

Sidoo kale, waxaa loo baahanyahay in qof ahaan aan ugu hiillino afkan, sida arrimaha soo socda:

a. In aan waxba lagu kordhinin farta Af-soomaaliga, laguna socda habkii wax lagu qori jiray inta ay ka hirgalayaan arrimahaas hay'adaha ama dowladdu u xilsaaran yihiin.

b. In laga faa'iidaysto cilmibaarisyadii horey loo sameeyey, waqtina la isaga lumin in haatan dib loo bilaabo wax la baarayay muddo134 sano[17].

c. Maadaama bahda warbaahintu saamayn weyn ay ku leedahay wacyigelinta bulshada, waa in ay isku daydaa adeegsiga Af-soomaaliga hufan, yareeyaanna ereyada shisheeye ee laga maarmi karo.

d. Inteenna wax qorta, waxaa inala gudboon, in aynu u guntanno ka qayb qaadashada "*Ololaha u hiillinta afka hooyo*", innagoo ku billaabayna sidii aan u yarayn lahayn adeegsiga Af-Soomaaliga barxan, laga bilaabo madasha aynu haatan joogno!!

[17] Cilmibaarisyada ku saabsan Af-soomaaliga ee horay loo sameeyey, laga billaabo qoraalkii F.Praetorius (1870), *Uber die Somalisprache*, "*Zeitschrift der Deutschen Morgenlandschen Gesell-schaft*" 24, pp. 145-171) , waxaa badankooda laga heli karaa maktabadda "Archivio Somalia" oo "online" ah: http://www.archiviosomalia.it/ilprogetto_en.html

## **Raadraac**


- Abdalla Omar Mansur & Annarita Puglielli, 1998, *Barashada Naxwaha Af-soomaaliga*, London, Haan.
- Abdalla Omar Mansur & Ahmed Abdullaahi Ahmed, 1985, *Qaamuus af Taliyaani-Soomaali,* Madbacadda Qaranka, Muqdisho.
- Abdalla Omar Mansur, 1988a, "*A lexical aspect of Somali and Eastern Cushitic Languages*", in: PUGLIELLI A. (ed.), *Proceedings of the Third Internatinal Congress of Somali Studies,* pp. 11-18, Roma.
- ----------------------------, 1988b, *Le Lingue Cuscitiche e il Somalo*, Studi Somali, n.8, ed. italiana a cura di SERRA BORNETO C., Ministero degli Affari Esteri, Roma.
- ----------------------------, 1981, *Afafka Bahda Kushitigga iyo taariikhda Af-soomaaliga*, Madbacadda Jaamacadda Ummmadda Soomaaliyeed, Muqdisho.
- ----------------------------, 1989, "*Bayso and Southern Somali Dialects*", in II International Symposium on Cushitic and Omotic Languages, Torino -Villa Gualino- 16-18 noven.
- ----------------------------, 1998, "*Somali: From an Oral to a Written Language*", in: DIOGENES, n. 184, Vol. 46/4, Berghahn Books, New Yok Oxford.
- ----------------------------, 2009, *Taariikhda iyo Luqadda Bulshada Soomaaliyeed*, 292 bog., Iftiinka Aqoonta, Stochoolm.
- Andrzejewiski,B.W., 1974, *The Introduction of a National Orthography for Somali, SOAS.*
- Axmed Faarax Cali "Idaajaa", 2002, *Af-Soomaaliga iyo warfideyeenka maanta*, Birmingham (UK).
- Banti, G.,"*Pour une caracterisation du Somali ecrit,* Djibouti 13-15.12.2007.
- Cabdiraxmaan Faarax "Barwaaqo", *Xasilloonidarrada Af-soomaaliga*. <Http://www.somaliatalk.com/afsomali/afsomali.html>.
- Collins G.M., 1985, *English-Italian, Italian-English Dictionary,* (ed) Catherine E. Love, Firenze.
- Guddiga Af-soomaaliga, 1961, *«The Report of The Somali language Commitee »,* Muqdisho.
- Hornby A.S. 1986 *Oxford advanced learner's dictionary of current English.*
- Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd", 2007, Af Soomaali: Qabyannimo, Xasilloonidarro Iyo Aqoondarro Intaba, Somaliland, Org Archives.
- Lamberti M., 1984, *The Linguistic Situation in the Somali Democratic Republic*, in Labhan Th. (ed), vol. I, pp. 155-200.
- Mohamed Ismail Abdirachid, 2011, *Dialectologie du somali: problématiques et perspectives*, Thèse. de doctorat, Inalco, Paris.
- Puglielli A., Abdalla O. Mansur, 2012, *Qaamuuska Af-soomaaliga*, Univerità degli Studi Roma Tre Press (qiyaastii: 1000 bog iyo 50.000 erey).
- Yaasiin C. Keenediid, 1976, *Qaamuuska Af-soomaaliga,* Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare, Akedemiyada Dhaqanka –Guddiga Af-soomaaliga-.Firenze.
- Mauro Tosco (University of Turin), *Somali writings*, Afrikanistik online 2010, http://www.afrikanistik-online.de/archiv/2010/2723/